# SHARCIGA DAMBIYADA ee KANADA

LEGAL INFO
NOVA SCOTIA









SOMALI / AF-SOOMAALI

# SHAXDA TUSMADA


| | |
|---|---|
| Hordhac Sharciga Dambiyada | 1 |
| Ogaashaha Xuquuqdaada | 2 |
| Dhalinyarada iyo Sharciga Dambiyada | 4 |
| Caddaaladda Dib-u-heshiisiinta | 5 |
| Tagista Maxkamadda | 6 |
| Maxaa Xiga | 7 |
| Helitaanka Caawimaad Sharci | 8 |


HALIFAX LEGAL INFO NOVA SCOTIA

Xuquuqda daabacaadda 2026 ee Bulshada Macluumaadka Sharciga ee Nova Scotia.

Anigoo u mahad celinaya maamulka gobolka Halifax.

# HORDHAC SHARCIGA DAMBIYADA

Shuruucda Kanada waxaa sameeya dowladda iyo maxkamadaha. “Sharciga dambiyada” waa xeerar noo sheegaya waxa aan sameyn karno iyo waxa aanan sameyn karin. Waxa kale oo ay sheegaan waxa dhici kara haddii sharciga la jebiyo.

Isha ugu weyn ee sharciga dambiyada waa Xeerka Dambiyada Kanada. Shuruucda Kanada waxay khuseeyaan qof kasta oo jooga Kanada, xitaa haddii aadan ahayn muwaadin ama degane rasmi ah. Qof kasta oo ay booliisku joojiyaan ama lagu soo oogo dambi wuxuu leeyahay xuquuq.

Gobol kastaa wuxuu sameeyaa sharciyo la xiriira wadista baabuurta iyo badbaadada dadweynaha. Tan waxaa ka mid ah xeerarka ku saabsan waxyaabaha sida xawliga xaddidan, isticmaalka taleefanka gacanta markaad baabuur wadid, ama addeecida calaamadaha taraafiggu.

Booliisku waxay baaraan dambiyada. Haddii ay jirto caddeyn muujinaysa in qof dambi galay, waxaa lagu soo oogi karaa dacwad. Taas macnaheedu waa booliisku waxay rumeysan yihiin in qofkaas jebiyey sharciga. Qofka la eedeeyay waxaa laga yaabaa inuu maxkamad tago.

Garyaqaanada dowladda (Crown Attorneys) waa qareenno u shaqeeya dowladda. Shaqadoodu waa inay caddeynta booliisku soo ururiyeen u gudbiyaan garsooraha.

Qofka dembi lagu soo eedeeyay waa inuu galaa dacwo. Tani waxay ka dhigan tahay inay maxkamadda u sheegi doonaan haddii ay dambiile yihiin iyo haddii aanay dembi lahayn. Haddii uu qirto, garsooraha ayaa go’aaminaya ciqaabta. Ciqaabtu kama badnaan karto waxa uu oggol yahay Xeerka Dambiyada.

Haddii uu diido dambiga, waxaa jiri doona maxkamad (trial). Labada dhinac ayaa sharxi doona mowqifkooda, garsooruhuna wuxuu gaari doonaa go’aan.



# OGAASHAHA XUQUUQDAADA

Markaad la hadlayso booliska ama aad maxkamad tagto, waxaad xaq u leedahay turjubaan.

Haddii booliisku ku joojiyaan ama ku xiraan, waa inay kuu sheegaan sababta luqad aad fahmi karto. Haddii ay isticmaalaan turjumaad elektaroonik ah, waxaad codsan kartaaqof turjubaan dhab ah.

Booliisku ma aha inay ku dhaawacaan jir ahaan ama isticmaalaan xoog ka badan inta loo baahan yahay.

Waa muhiim inaad ogaato in booliisku loo oggol yahay inay kuu been sheegaan. Waxay dhihi karaan waxay haystaan caddayn inaad jebisay sharciga ama ay la hadleen qof kale. Tani waxay noqon kartaa been.

Haddii lagu wareysto ama lagu xiro, waxaad xaq u leedahay inaad la hadasho qareen. Marka aad codsato qareen, booliisku ma sii wadi karaan su'aalaha ilaa aad la hadasho qareen.



Booliisku ma baari karaan gurigaaga, gaarigaaga, ama alaabtaada haddii aysan haysan sabab macquul ah. Haddii ay ku weydiiyaan oggolaansho, waad diidi kartaa.

Haddii lagugu soo oogo dambi, waxaa lagu siinayaa warqad sheegaysa goorta aad maxkamad tagi doonto.

Haddii ay u maleynayaan inaadan aadin maxkamad, ama laga yaabo inaad dhaawacdo naftaada ama qof kale, way ku hayn karaan ilaa maalinta xigta ee shaqada waxayna ku geyn karaan maxkamad markaas. Tani waxay ka dhigan tahay in haddii lagu xiro maalmaha fasaxa ah, booliisku waxay ku hayn karaan ilaa Isniinta markaas oo maxkamaddu furan tahay.

Haddii booliisku aanu raacin xeerarkan, waxaad xerayn kartaa cabasho ama ka warbixi kartaa. Qor wixii dhacay sawirna ka qaad haddii aad leedahay nabaro ama dhaawacyo. Qor taariikhda, wakhtiga, goobta, iyo faahfaahin kasta oo aad xasuusato wixii dhacay.

# DHALINYARADA IYO SHARCIGA DAMBIYADA

Dadka da'doodu ka yar tahay 18 sano waxay leeyihiin xuquuqo iyo ilaalin dheeraad ah marka ay booliisku su'aalo waydiiyaan ama lagu soo oogo dembi. Xuquuqahaas waxaa abuuray sharci lagu magacaabo Xeerka Caddaaladda Dembiyada Dhallinyarada.

Carruurta ka yar 12 sano lama dacweyn karo.

Marka qof da'diisu tahay 12-17 sano lagu soo oogo dambi, booliisku waa inay u sheegaanwaalidkood ama mas'uulkooda. Dhallinyaradu waxay xaq u leeyihiin inay la hadlaan qareen wakhti kasta oo ay la hadlayaan booliiska ama ay tagayaan maxkamad.

Marka qof ka yar 18 jir lagu soo oogo dembi, uu yahay dhibane dambi, ama uu markhaati u yahay dembi, waxay leeyihiin xuquuqo gaar ah oo dheeraad ah. Qofna looma oggola inuu magaciisa ku wadaago internetka ama wararka.

Haddii aad aado dugsiga, waa inaad sidoo kale raacdaa sharciyada dugsiga. Haddii aad joogto dugsi ama dhacdo dugsi oo macallin ama shaqaaluhu u maleeyaan inaad jabisay sharciga dugsiga, way baadhi karaan adiga ama alaabtaada. Waa inay haystaan sabab wanaagsan oo ay ku rumaystaan in raadinta ay ka caawin doonto inay runta ogadaan.

Sababtaas waxay noqon kartaa macluumaadka ay ka helaan ardayda kale ama macalinka ama shaqaalaha. Tan waxa ku jiri kara waxyaabo ay ka mid yihiin daroogooyinka uraysa ama alkohol adiga ama alaabtaada, ama qof sheegaya in uu hub ku arkay boorsadaada ama sanduuqaaga.



Haddii booliiska ama xaakimku ay yiraahdaan waa inaad ka fogaataa arday kale oo dugsigaaga jooga, weli waad aadi kartaa dugsiga. Haddii aad ku aragto qofkaas dugsiga ama beeshaada, waa inaad ka fogaataa iyaga. Haddii aad u baahan tahay inaad bedesho xiisadaha si aad uga fogaato, dugsigu wuxuu kaa caawinayaa inaad isbeddelkaas samayso.

# CADDAALADDA DIB-U-HESHIISIINTA

Caddaaladda Dib-u-soo-celinta waa barnaamij dadka ka caawiya inay wax ka bartaan khaladaadka oo ay ka fogaadaan dhibka daran. Haddii uu qofku muujiyo inay dhab ka tahay wax ka qabashada dhibaatada uu u geystay qof kale ama bulshadiisa, Caddaaladda Soo Celinta waxay keeni kartaa xukun ka yar kii hore ama fursad uu kaga badbaado diiwaan dembiyeed.

Qofka waxa u gudbin kara boliiska, qareenada, ama garsooraha soo celinta wakhti kasta. Wakaaladaha la shaqeeya dhibanayaasha waxay sidoo kale u diri karaan qof. Gudbintu waxay dhici kartaa ka hor intaan qof lagu soo oogin dembi, ka dib marka uu tago maxkamadda, ama ka dib marka la xukumo.

Qofku isuma gudbin karo Garsoorka Soo celinta, laakiin wuxuu codsan karaa tixraac. Si uu uga qayb qaato dib u soo celinta cadaalada, qofku waa inuu aqbalaa "la xisaabtanka". Taas macneheedu waa inay qirtaan inay sharciga jabiyeen ama ay qof dhaawac u geysteen.

Aad ayey muhiim u tahay inaad la hadasho qareen ka hor intaadan booliiska ama garsooraha u sheegin inaad sharciga jabisay.

Caddaaladda soo celinta waa ikhtiyaar u ah dhammaan noocyada kiisaska, marka laga reebo xadgudubka galmada ama rabshadaha qoyska. Tan waxa ku jira gacan ka hadal lagula kacayo qof aad shukaansanayso ama xidhiidh jacayl ama galmo la leedahay.



Ka dib marka kiiska la gudbiyo, shaqaalaha cadaaladda soo celinta ayaa la xiriiri doona dhammaan dadka kiiska ku lugta leh. Tan waxaa ku jiri kara eedaysanaha, dhibanayaasha, xubnaha bulshada, iyo booliiska. Waxay ka wada shaqayn doonaan si ay u fahmaan wixii dhacay, sida ay u saamaysay qof kasta, iyo waxa ay tahay inay dhacaan si loo xaqiijiyo natiijo cadaalad ah.

# TAGISTA MAXKAMADDA



Marka qof lagu soo oogo fal-dembiyeed, soo xaadiritaankooda ugu horreeya ee maxkamadda waxaa loo yaqaannaa dacwad. Waxaa jiri doona dhowr kiis oo ay maxkamaddu isla maalintaas qaadi doonto. Si taxadar leh u dhegeyso si aad u maqashid marka karraaniga maxkamadu u yeero kiiskaaga. Haddii aad u baahan tahay turjumaan, u sheeg maxkamadda sida ugu fog ee suurtogalka ah.

Marka karraaniga u yeero magacaaga, waa inaad u socotaa xagga hore ee maxkamadda halkaasoo garsooruhu ku arki karo. Karraaniga maxkamada ayaa akhrin doona dacwada lagugu soo oogay. Garsooraha ayaa ku weydiin doona haddii aad fahantay eedeynta. Garsooraha u sheeg haddii aad fahmi waydo, garsooruhuna wuu kuu sharxi doonaa.

Garsooraha ayaa ku weydiin doona haddii aad dembiga qiran doonto iyo in kale. Haddii aadqirato inaadan dembi galin, garsooruhu wuxuu dejin doonaa taariikh maxkamadeed. Haddii aad qirato dambiga, xaakimku waxa uu qaban doonaa taariikhda xukunka lagu ridayo. Haddi aanad hubin waxa aad odhanayso ama aad u baahantahay wakhti dheeraad ah oo aad la hadasho qareen, codso in dib loo dhigo. Dib-u-dhigiddu waxay ka dhigan tahay inaad heli doonto taariikh cusub oo maxkamadeed.

Waa inaad heshaa talo sharci oo ku saabsan xaaladdaada ka hor inta aadan go'aansan sida loo dacwoodo. Waa muhiim inaad ka hesho daah-furka Qareenka weyn oo aad dib ula eegto qareen, haddii ay suurtagal tahay, ka hor inta aanad gelin rafcaan.

Siidaynta macneheedu waxa weeye in Xeer Ilaaliyaha weyn uu ku siiyo koobiyada dhammaan cadaymaha la xidhiidha kiiskaaga. Tan waxa ku jira warbixinada booliiska, bayaannada markhaatiga, iyo dukumeenti kasta oo kale.

# MAXAA XIGA

Haddii aad qirato dembiga ama garsooruhu uu go'aamiyo inaad dembi gashay maxkamadaynta ka dib, waxaad yeelan doontaa rikoor dembi. Tani waxay adkeyn kartaa inaad hesho shaqo ama aad noqoto degane rasmi ah ama muwaadin.

In lagugu xukumo dembi macnaheedu maaha in aad xabsiga geli doonto, gaar ahaan haddii ay tahay dembigaaga ugu horreeya oo aanay cidina si xun u dhaawacmin. Waa lagu xukumayaa. Tani waxay la macno noqon kartaa inaad bixiso ganaax, ka qabato shaqada bulshadaada, xiisado, ama aad la-talin.

Waa inaad raacdaa shuruudaha haddii lagugu soo oogo dembi ama lagugu xukumo. Kuwani waa xeerar ay dejiyeen booliiska ama garsooraha. Waxaa laga yaabaa inay kuu sheegaan inaad ka fogaato meel gaar ah, ama inaadan wax xiriir ah la yeelan qof gaar ah. Waxaa laga yaabaa inaad guriga joogto wakhti go'an habeen kasta. Haddii aad jebiso shuruudahan, waxaa lagugu soo oogi karaa dambi kale.

Haddii aadan raaci karin shuruudahaaga sababtoo ah dugsiga, shaqada, ama mas'uuliyadaha qoyska, waa inaad ka codsataa maxkamadda si aad u bedesho shuruudahaaga. Waxaad ka heli kartaa foom maxkamada gobolka si aad u codsato isbedel. Garsooruhu waa inuu oggolaadaa isbeddellada. Haddii kale, waa inaad raacdaa shuruudahaaga.



# HELITAANKA CAAWIMAAD SHARCI

Haddii aad ka yar tahay 18 ama aad dakhli yar leedahay, waxaad kaheli kartaa caawimaad sharci oo bilaash ah Nova Scotia legal Aid. Waxad codsan karta Gargaarka sharci oqadka ah www.nslegalaid.ca mise xafiska kugudow cawimada sharciga.

Qareen shaqaale ah oo ka socda xafiiska Gargaarka Sharciga ayaa laga yaabaa in lagu meeleeyo kiiskaaga. Waxay ku siin doonaan talo sharci waxayna kula tagi doonaan maxkamad.

Haddii xafiiska Kaalmada Sharcigu aanu qaadi karin kiiskaaga, waxa laga yaabaa inay bixiyaan shahaado Kaalmo Sharci. Tani waxay ka dhigan tahay inay bixin doonaan kharashka qareenka gaarka ah si uu uga shaqeeyo kiiskaaga. Legal Aid waxay ku siin kartaa liiska qareenada qaata shahaadooyinka, laakiin waxaad u baahan doontaa inaad adigu wacdo.

Haddii lagu xiro, booliisku waa inuu kuu oggolaadaa inaad la hadasho qareen. Waxaad wici kartaa Gargaarka Sharciga wixii talo ah. Booliisku waa inay ku siiyaan lambarka taleefanka iyo gelitaanka taleefanka. Waa inay kuu ogolaadaan inaad si gaar ah qareenka ula hadasho.

Haddii aad tagto maxkamad oo aadan lahayn qareen, waxaad la hadli kartaa qareenka heeganka ah. Kani waa qareen u shaqeeya Legal Aid oo dadka siiya bilaash, talo sharci oo aasaasi ah maxkamada. kama shaqeeyaan kiiskaaga oo dhan. Waxay bixiyaan talo taariikhda maxkamadda oo keliya.

Legal Aid waxa ay kaliya caawisaa sharciga qoyska iyo sharciga dembiyada. Kuma caawiyaan tigidhada taraafigga. Haddii aad qabto dhibaato sharci oo ka duwan, waxaad u baahan doontaa inaad qabsata qareen ama wakiil naftaada isunoqoto.

Bulshada Macluumaadka Sharciga ee Nova Scotia waxay ka jawaabi karaan su'aalaha ku saabsan sharciga. Waxaad su'aalo ku weydiin kartaa iimayl, sheeko toos ah, qoraal, ama taleefan. Waxay kaa caawin karaan inaad fahanto fursadahaaga iyo waxa sharcigu leeyahay. Ma ku siin karaan talo sharci ama kulama tagi karaan maxkamad. Websaydhkoodu waa www.legalinfo.org. Lambarkoodu waa 1-800-665-9779.